Kaaliyahaaga arrimaha dhaqaale ee duqooshinka

The Law Society

Agaasimidda mustaqbalkaaga

Qof kasta oo weyn xaw ayuu u leeyahay agaasimidda dhaqaalaha iyo arrimahiisa. Mararka qaar, si kastaba ha ahaatee tabarteena hoos ayey u dhacdaa hadba inta aanu sii duqoobeyno. Taasi waxay ka imaan kartaa xanuun, ama shil (accident) waxaana jiraa tallaabooyin aad qaadi kartid ee aad ugu diyaargaroobeysid arrimahaasi

Haddii tani ay tilmaameyso xaaladda aad ku sugan tahay, waa in aad ka fikirtaa haddaad raadsan doontid looyar ku siiyo talabixin. Looyarka wuxuu kugu dhiirrigelin karaa sidii aad arrimahaaga u agaasiman lahayd iyo mustaqbalkaadaba. Tasaina waxay noqon kartaa qoritaanka dardaaranka (will) ee aad ku magacaabaneysid qof arrimahaaga iyo dhaqaale kuu agaasimo (qof sharci u haysto in uu arrimahaaga agaasimo) haddii loo baahdo.

Tanina waxay culeyska hawsha ka qaadi doontaa dadka qaraabada ama daryeeleyaasha ah eeay ku adkaan doonto sidii ay arrimahaaga u go'aamin lahaayeen.

Haddii aysan jirin wakhti ku filan gaaritaanka go'aanadani, ama haddii qofka uu hadda yahay 'qof aan waxba kala garaneynin' (aan qabsan karin arrimaha dhaqaale), sida waa dadka qaraabada ah kuwa u baahan talobixin. Gooraha aysan jirin wakhti ku filan raacidda tallaabooyinkaasi, ama haddii qofka uu ku jiro xaalad uusan waxba kala garaneynin, waxaa jiraa dhowr arrimood ee la sameyn karo. Mid ka mid ah tallaabooyinkaasi waa la xiriiridda Maxkammadda Badbaadinta (Court of Protection), taasi oo sameyn karto qorshe lagu maamuli karo dhaqaalaha qofka. Looyarka ayaa kuu sheegi doonaa habka ugu wanaagsan ee taasi loo sameeyo.

Raadinta looyarka

Haddii aadan hore u lahayn looyar, waxaad ka daalacan kartaa booggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk/findasolicitor kadibna ka raadso faafaahinta looyarrada ee xaafaddaada, ama waxaad toos usoo weci kartaa telefoonka 0870 606 2555.

Waxyaabaha ay looyarrada kaaga baahan yihiin in ay ogaadaan

Haddii aad tahay qofka kalayntiga ah (client), looyarkaaga wuxuu u baahan yahay:

- Haddii dardaaran aad sameysay iyo haddii aadan sameynin;
- Yaad dooneysaa in uu agaasimo arrimhaaga, haddii loo baahdo;
- Dhaqaalaha ama hantida aad leedahay;
- Haddii ay jiraan hab gaar ah ee aad dooneysid in loo agaasimo dhaqaala ama hantidaada; iyo
- Haddii ay jirto xaalad caafimaad oo gaar ah (haddii ay jirto, waxay u baahan doonaan oggolaansha in ay la hadlaan takhtarkaaga).

Haddaad heshid talobixin maaddaama aad qof da' ah mas'uul ka tahay, looyarka waa in marka hore uu oggolaansho iyo akhbaar ka helaa qofkaasi da'da ah. Goorta looyarka uu ka baaraandego akhbaartaasi ayuu kuu sharxi karaa fursadaha ku bannaan. Kuwaasina waa sida hoos ku qoran.

Xukunka amarka maxkammadda

Tani waa hab sharciyeed ee qof kale loogu wareejiyo mas'uuliyadda amarka maamulka arrimaha dhaqaale goorta uu qofka waxba qabsan karin ama maamulan karin taasi oo ay ugu wacan tahay xanuun ama curyaanimo. Sida badan waxaa lo magacaabaa qof aaminaad ah oona ah saaxib ama qaraabo ama looyar oo ahaam doono haayaha amarka'sharciyeed' (attorney). Ma jirto cid iskala 'wareegi' karto amarka sharciyeed. Waa in aad six or ah 'u wareejisaa'. Qofka xilka wareejinayaa ayaa iska leh go'aanka cidda uu ku wareejinayo, isla markaana isagaa joojin karaa (cancel) wixii heshiis ah goor kasta ee uu doono.

Amarka sharciyeed wuxuu dhaqangeli karaa haddii qofka uu si buuxda u ogsoon yahay qorshaha wareejinta mas'uiliyadda.Amarka sharciyeed wuu baabi' doonaa haddii qofka uu wax kala garashada gabo ama uusan agaasim karin dhaqaalahiisa.

Amarka sharciiyeed ee joogtada ah

Amarka sharciyeed ee joogtada ah (lasting power of attorney) wuu ka mudda badan yahay ama ka sarreeya amarka sharciyeed ee caadi ah (ordinary power of attorney), waayo wuu socon doonaa, ama 'jiri' doonaa hataa kadib goorta uu qofka uusan maamuli karin arrimahiisa – taasii oo ah mid joogto ama ku meel gaar ah, xanuun, curyaanimo ama shil awgood. Amarka joogtada ee sharciga wuxuu hadda beddelay amarrada muddada dheer ee sharciga (enduring powers of attorney), inkastoo amarrada muddada dheer ee sharciga ee la soo saaray wixii ka horreeyey 1 Oktoobar 2007 weli la isticmaalo karo. Amarrada muddada e sharciga waxaa la sameyn karaa wixii ka dambeeyey 1 Oktoobar 2007.

Si amarka joogtada ee sharciyeed ee u dhaqangalo, waa in qofka uu si buuxda u fahansan yahay arrimaha qorshaha goorta uu go'aankaasi sameynayo. Waxaa la sameyn doonaa shahaado (certificate) lagu saxiixayo in qofka uu ogsoon yahay arrimaha xil wareejinta isla markaana aysan jirin cid kugu khasbeyso sameynta amarka joogtada ee sharciga. (Bixiyaha shahaadada waa qof aqoon kuu lahaa labada sano ee la soo dhaafay,ama qof kale oo ku takhsuusay qiimeynta dadka wax kala garashada gabay). Qofka amarka sharciyeed lagu wareejinayo (attorney) waa in uu ka weyn yahay da'da 18 jirka isla markaana uusan ahayn qof cayr ah (bankrupt) si uu u sameeyo go'aanka hantida ama dhaqaalaha qof kale. Isla hal mar ayaa la magacaabi karaa in ka badan hal qof ee amarka wareejinta.

Kaaliyahaaga sharciga ma sameyn karo wax go;aan ah eek u saabsan arrimahaaga ilaa amarka joogtada ee sharciga laga diiwaangeliyo Xafiiska Ilaaolinta Danaha Dadweynaha (Office of the Public Guardian), kaasi oo xaqiijin doono in qofka wakiil kaa noqon doono uu ogsoon yahay waajibaadka ka saran fulinta danahaaga. Xafiiska Danaha Dadweynaha lacag ayaa lagu siiyaa diwaangelinta amarka joogtada ee sharciga.

Go'aanada gaarka iyo daryeelka

Amarka joogtada ee sharciga oo ka duwan midka caadiga ah ayaa loo sameyn karaa qofka wakiilka taasi oo siinayso qofkaasi xaquuqda go'aanada daryeelkaaga iyo arrimaha caafimaadka la xirrira., iyo isla markaasi goaa'nada mustaqbalkagoka haddii aadan adiga wax go'aan ah sameyn Karin.

La xiriiridda looyarka ayaa ah habka ugu wanaagsan ee lagu sameyn karo amarka joogtada ee sharciga tasai oo si wanaagsan loo qorsheeyey loona diwaangeliyey iyadoo la fuliyo rabtiaabka iyo danaha qofka.

Maxkammadda Badbaadinta

Haddii qofka uusan sameyn Karin wax go'aan ah, isla markaasina aysan saemeynin amarka joogtada ee sharciga, sameynta go'aanada aysan ahayn mid si cadai ah loo sameyn karo, arrinta waxaa loo gudbin karaa Maxkammadda Badbaadinta (Court of Protection). Waxaa suurtowda in maxkammadd ay go'aamiso go'aanka wakiil ka noqoshada qofka, ama waxay u magacaabi karaan qof kale, kaasi oo loo yaqaano 'kaaliyaha' (deputy) ee qofka u sameyn doono go;aanada. Goorta maxkammadda ay kalaiye u magacawdo agaasimidda hantida iyo dhaqaalaha qofka kale, sida kaaliyaha wuxuu hayn doonaa xisaabaadka, taasi oo la gelin doono nidaamka sugitaanka ammaananada, kadibna u sheego Xafiiska Ilaalinta Danaha dadweynaha. Maxkammadda Badbaadinta waxay dadka ka qaataa kharashka codsiga, Xafiiska Ilaainta Danaha Dadweynaha way iyaguna ka qaadaan dadka kharashka sanadka taasi oo lagu bixinayo shaqada agaasimidda hawsha kaaliyaha

Kaaliyahaaga arrimaha dhaqaale ee duqooshinka

The Law Society

Wakiilashada

Haddii uusan waxba kala garaneynin uuna qaato lacagta beenshanka, ama lacagta benefityada kale ee dowladda, Waaxda Shaqada iyo Beenshanka (Department for Work and Pensions) ayaa u magacaabi kartaa qof 'wakiil' ah ee u qaado benifityadaasi. Qofkaasi wakiilka ah wuxuu noqon karaa qof qaraabo, saaxib ah ama qof shaqaale ah (sida qof ka socda adeegyada sooshiyalka ee xaafadda). Waxaa laga codsan doonaan in ay keenaan caddeynta in qofka ay wakiilka ka noqonayaan in uu yahay qof aan waxba kala garan Karin, sida shahaadada takhtarka. Wax lacag ah laguma qaado adeeggani.

Arrimaha kale ee dhaqaale

Looyarka wuxuu kaala talin karaa waxyaabo badan iyo arrimaha sharciyeed ee saameeyo duqooshinka. Tusaale:

- Qorshaha wareejinta mulkinta (equity-release schemes), taasi oo lagu wareejinayo hantida iyo mulkinta la xiriirta gurigaada;
- Qorshaha daryeelka muddo dhee;
- Qorshaha hantida guriga ee sameynta dardaaranka ama haddiyadda nolosha; ama
- Gooraha aad ka shakisid in qof duq ah ay haysato dhibaatada agaasin xumida hantidiisa (financial abuse).

Kharashka

Kharashyada looyarrada way kala duwan yihiin, waxayna ku xiran tahay xaaladda qofka iyo nooca kaalmada iyo talobixinta uu qofka u baahan yahay. Inta aadan go'aansan looyar gaar ah waa in qofka marka hore uu soo eegaa dhowr looyar kana fiirsado in uu goor kasta u tegi karo looyarka iyo khibradda uu looyarka u leeyahay hawshaasi. Waxaa kaloo loo baahan yahay in qofka uu ogsoon yahay kharashka uu looyrka ka qaadi doono, illaase taasi kelito kuma koobno waxyaabaha ka fiirsashada. Aad bay muhiim u tahay in aad heshid looyar aad u tegi kartid goor kasta oodna fahmi kartid talobixintiisa.

Akhbaar dheeraad ah

Tani waxay ka mid tahay dhowr xaashiyo oo ku saabsan sharciyada caadi ee laga heli karo adeegyada sharciga looyarada sharciga. Xaashiyaaha kale ee waa kuwa hoos ku taxan. Waxaad ka heli kartaa looyarkaaga ama telefoon ayaad usoo diri kartaa Ururrada Sharciyeed ee England iyo Wales ee ah 0870 3333 084.

- Kaaliyahaaga ee sameynta dardaaranka
- Kaaliyahaaga ee iibsashada guriga
- Kaaliyahaaga ee sameynta furiinka
- Kaaliyahaaga ee dhibaatooyinka shaqada
- Kaaliyahaaga ee sameynta ganacsiga
- Kaaliyahaaga ee sameynta codsiga magdhowga ee qofka
- Kaaliyahaaga ee la degidda xaaskaaga
- Kaaliyahaaga ee ijaaridda gurigaaga
- Kaaliyahaaga ee ijaarashada guriga
- Kaaliyahaaga ee adeegsiga looyarka
- Kaaliyahaaga ee dardaaranka sharciyeed (probate)
- Kaaliyahaaga ee codsiga magangelyada

Waxaad heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran far waweyn, farta baraylka ee indhooleyaasha, iyadoo ku duuban cajaladda maqalka ama CD. Haddaad u baahan tahay mid ka mid ah kuwani, fadlan waxaad nagula soo xiriirtaa iimeylka accessibility@lawsociety.org.uk ama kala xoo xiriir telefoonka 0870 606 2555.

Waxaad kalood heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran luqado kala duwan. Waxaad ka daalacan kartaa boggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk.

Lexcel

Look for Lexcel - the mark of excellence

The Law Society 113 Chancery Lane London WC2A 1PL Telefoonka: 020 7242 1222 www.lawsociety.org.uk

Inkastoo aanu ku dadaalnay tebinta akhbaar hufan, haddana ogsoonow, goor kasta qaynuunka iyo sharciga isbeddel ayaa lagu sameeyaa taasi oo qof kasta si gaar ah u saameyso. Xaashidani kuma saabsano akhbaar ama talobixinta shaqsiyaad gaar ah, sidaasi awgeedna mas'uul kama aanu nihin wixii dhibaato ah ee ka yimaaddo akhbaarta xaashidani.

Designed by dmlmarketing.co.uk Version 2, 2007 Your guide to financial matters for the elderly - Somali